

## **Waxaa halkaan ku qoran WAR CAAFIMAAD OO MUHIIM AH oo ku saabsan talaalada ilmahaaga.**

Sharcigu waxuu Waaxda Caafimaadka Guud ee Ontario faraya helitaanka wax xaqiijinaya in si waafaqsan jadwalka talaalka ee Ontario, ilmahaaga talaalada oo idil loogu dhammeeystiray. Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel galka kuma aay haayso rikoorada talaalka ilmahaaga, ama rikoorka ilmahaagu waxuu muujinaya in iyadu/isagu talaalkiisu uusan waafaqsanaayn sharuudaha Ontario.

Takhtarka qooyaskaagu uma soo gudbiyo Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel xaaladda talaaleed oo ilmahaaga. Adigu waalid ahaan (ama wali ahaan) waa in aad na siisa ilmahaaga rikooradooda talaalka.

### **TALAALADA LOO BAAHAN YAHAY**

dhammaan ilamaha 18 sano ka yar waa in lagu dura talaalka dhalaanka iyo xoojiyaha si looga hortago cudurrada:

- Qoor-go'ye 'diphtheria'
- dabeeyl 'polio'
- teetano 'tetanus' (oo xitaa loo yaqaan 'lockjaw')
- jedeeco 'measles'
- qaamo-qanshiir 'mumps'
- 'rubella' (oo xitaa loo yaqaan jedeecada Jarmalka)

Caruurta waa ineey helan talaalada ku haboon wakhtiga loogu talagalay.

### **LA-SCODSIINTA RIKOORADA TALAALKA ILMAHAAGA**

Haddii ilmahaaga talaaladu u dhammeestiran yihiin, fadlan la socodsi Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel adigoo hababka soo socda u isticmaalaya:

- **Naga soo wac 905-799-7700.** Waxaan ku diyaarin karan turjibaan haddii aad mid u baahan tahay. Haddii aad degen tahay Caledon, wac 905-584-2216.
- **Shabakadda internetka** [www.immunizepeel.ca](http://www.immunizepeel.ca)
- **Haddii aad boostada ku direeysid ama aad adigu gacanta ugu geeyneeysid ku toosi ciwankaan:**

Immunization Records  
Peel Public Health  
7120 Hurontario Street  
P.O. Box 630  
Mississauga, ON L5M 2C5

Haddii aad rikoorada boostada ku direeysid, hubi in aad dirto nuqul keliya-oo aadan dirin waraqadda asalka ah-. Haddiise aad rikoorada gacanta ku keeneeysid, soo qaado warqadda asalka ah galalkaaga baan nuqul u uga daabici doona.

## **WAKHTI WAAFAJINTA TALAALADA ILMAHAAGA**

Haddii ilmahaagu u baahan yahay talaal:

- 1) Balan talaal u dhigo takhtarka qooyaskaaga ama u tag kilinikada balan la'aanta la isaga tago oo agtaada ah.
- 2) Isla marka ilmahaaga la talaalo, **sid ugu dhaqsiino badan wararka ugu dir Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel.**

## **U OGGOLAASHA DHIGASHADA DUGSIGA**

Ardada rikoorada talaalkoodu usan wakhtiga waafaqsaneeyn **waxaa suurtoowda in aan loo oggolaan aadidda dugsiga.** Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel ayaa kaa caawindoona wakhti waafajinta rikoorka ilmahaaga si dhicitaanka arrintaasi looga hortago.

## **TALAALDA LAGU SAMEEYAY CANADA BANAANKEEDA**

Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel lacag la'aan ayeey Ingriis ugu turjimidoonta rikoorada talaalka ardayga. Naga wac 905-799-7700 si loogu talagalo tarjumidda rikoorka ilmahaaga. Haddii aad degen tahay Caledon, wac 905-584-2216.

## **MA HEEYSATID WARQADDA OHIP-KA?**

Haddii ilmahaagu usan lahaayn Warqadda Caafimaadka ee Ontario (OHIP), lacag la'aan ayaan isaga ama iyada ku talaali doona.

Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel ka wac 905-799-7700 si aad balan ula sameysatid. Haddii aad degen tahay Caledon, wac 905-584-2216.

## **TALAALADU WAXEY BADBAADINAYAN ILMAHAAGA**

- Talaaladu waxeey ilmaha ka badbaadinayan cudurro la-isku daarto oo halis ah.
- Ilmahaaga ku wad talaalidda noolosheeda ama nooloshiisa oo idil.
- Markasto oo ilmahaaga la talaalo u dir Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel rikoorada talaalka ilmahaaga.

Haddii wax su'aal ah aad qabtid fadlan naga soo wac **905-799-7700**. Haddii aad degen tahay Caledon, wac 905-584-2216. Waan ku diyaarin karnaa haddii turjibaan aad u baahan tahay. Wakiilka u sheeg luqadda aad ku hadashid wakiilkuna waxey/waxuu kugu xiridoona turjibaan ku hadla luqaddaada

Mahad sanid.

Koox Rikoorada Talaalka  
ee Waaxda Caafimaadka Guud ee Peel